

## Daweynta Cudurka Tiibishada Qarsoon (Latent Tuberculosis) (TB) Rifampin

Baaritaanadii laguugu sameyay waxay muujiyeen in aad qabtid cudurka TB qarsoon ama LTBI. Tani macnaheeda waxay tahay in jeermiga TB uu ku jiro jirkaada iyo in aad ku xanuunsan kartid.

Jeermiga TB kuma gaarsiiyo waxyeelo mana ku fidi karo dadka kale. Waxay u muuqdaan sida in jeermiga hurdo. Haddii jeermiga TB soo kacaan, waxay kuu keeni karaan xanuun. Tani waxaa lagu magacaabaa cudurka TB ee firfircoon. Waxaad TB ku faafin kartaa dadka kale haddii aad qabtid cudurka TB ee firfircoon.

### Sidee ayaan isaga ilaaliyaa cudurka TB ee firfircoon?

Waxaad qaadan kartaa daawo si aad uga hortagtid cudurka TB ee firfircoon. Rifampin waa daawo caadi ah oo loo isticmaalo in lagu daweydo LTBI. Waxay dishaa jeermiga TB ee jiifa ka hor inta aysan kuu keenin xanuun. Waxay qaadan kartaa bilal badan si daawada u disho jeerminga TB maxaa yeelay waxay leedahay xoog.

Qaado Rifampin in badan iyo ilaa inta takhtarkaada ama kalkaaliyaha kuu sheegaan. Waxaa ugu wanaagsan in aadan Rifampin ku qaadanin cuntada. Haddii caloosha ku qasan tahay, waa hagaag in aad Rifampin ku qaadatid qiyaas yar oo raashin ah ama iskuday in aad qaadaatid waqtiga jiifka.

### Maxay tahay sababta loogu baahan yahay in aan qaato daawo haddii aan dareemin xanuun?

Waa sahlan tahay in la dilo jeermiga TB ee hurda ka hor inta aysan soo kicin kaddibna aadan ku xanuunsanin.



### Maxaa dhaca haddii aan qaadan waayo daawada?

Haddii aadan qaadanin INH-RPT, haddii aad gaftid maalmo badan, ama joojisid in aad qaadatid daawada ka hor inta takhtarkaada iyo kalkaaliyaha aysan kuu sheegin, waxaan dhici karto in aad ku xanuunsatid cudurka TB ee firfircoon. Waxaa muhiim ah in la dilo jeermiga TB si aad adiga iyo qoyskaada u heshaan caafimaad.

### Maxaa dhaca haddii aan horay u qaatay talaalka BCG?

BCG waxay caruurta ka badbaadisaa noocyada darran ee TB hase ahaatee waxay shaqeyaan dhowr sanno keliya. Kaama badbaadin karto LTBI ama cudurka TB ee firfircoon. Haddii aad horay u qaadatay BCG, waxaa loo baahan yahay in aad weli u qaadatid LTBI si aad u badbaadisid naftaada iyo dadka kale.

### Maxaa dhaca haddii aan bixin waayo kharashka Rifampin?

Weydii takhtarkaada ama kalkaaliyaha sida aad daawada TB oo lacag la'aan ah uga heli kartid Minnesota Department of Health Tuberculosis Program (Barnaamijka TB Waaxda Caafimaadka Minnesota).

## Maxaa dhaca haddii aan guuro?

U sheeg takhtarkaada ama kaalkaaliyaha ka hor inta aadan u guurin gobol kale ama magaalo kale. Waxay kugu kaalmeyn karaan in aad sii waddid qaadashada daawada TB kaddib marka aad guurtid.

## Maxaa loo baahan yahay in aan ka ogaado daweynta LTBI?

- Ha cabbin beer, fiino, ama qamrada kulul, ilaa aad ka dhameysatid daweynta LTBI. Cabbitaanka qamrada adiga oo qaata daawada LTBI waxay waxyeelo gaarsiin kartaa beerkaada.
- U sheeg takhtarkaada dawooyinka kale aad qaadatid.
- Isticmaal hababka kaa celiya, sida bambiirada ragga gashtaan (condom), si aad isaga ilaalisid uurka. Rifampin waxay ka hortagi kartaa in ay si wanaagsan u shaqeyaan hormonaadka lagu kantaroolo dhallashada. Waxaad isla markiiba wacdaa takhtarkaada ama kalkaaliyaha haddii aad xaamilo noqotid.

### Inta badan dadka, dhibaato kuma qabaan qaadashada Rifampin. Qaar ka mid ah dadka waxay qabaan dhibatooyinka, sida:

- Qandho in ka badan saddax maalin
- Cunto xumo ama la dareemo daal
- Caloosha qasan ama mattag
- Calool xanuun
- Kaadi madow (midabka shaaha ama qaxwada)
- Maqaarka ama indhaha ay jaalo ku noqdo
- Nabarada maqaarka iyo cuncunka
- Kabaabyada ama dareenka ka luma gacmaha ama cagaha

### Haddii aad isku aragtid qaar ka mid ah dhibatooyinka:

1. Jooji in aad qaadatid daawada.
2. Waxaad isla markiiba wacdaa takhtarkaada ama kalkaaliyaha. Ha sugin ballankaada xiga.



**Xasuuso in aad qaadatid daawada TB.** Haddii aad gaftid maalmo aad u badan, waxaa dhici karto in daawada aysan shaqeynin. Halkaan waxaad ka heli doontaa dhowr siyaabo oo kugu kaalmeeyo xasuusta:

- Waxaad Rifampin dhigataa meel aad ku arki doontid.
- Qaado Rifampin waqti isla mid ah maalintii. Tusaale ahaan, kaddib marka aad rumeysatid ilkaha ama ka hor inta aadan jiiifanin.
- Weydiiso qof in uu ku xasuusiyo.
- Calaamee jadwalkaada kaddib marka aad qaadatid Rifampin.
- Waxaad xasuusin ama digniin gashataa telefoonkaada gacanta.
- Isticmaal sanduuqa xasuusinta kaniiniga.

Haddii aad gaftid maalmo, qoro si aad ugu sheegtid takhtarkaada ama kalkaaliyaha marka xiga aad u timaadid ballanka.

### Adkeey dhamaan ballamadaada caafimaadka.

Takhtarkaada ama kalkaaliyaha ayaa hubsan doono in daawada si wanaagsan kuugu socoto.

Ballankeyga xiga daweynta TB:

Taariikhda:

Wagtiga:

Takhtarka ama kalkaaliyaha:

Goobta: